Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

Hadal-Qoraalka Kalfadhiga 4aad
Documintiga kalfadhiga 4aad kulankii 15aad

Taariikh: 26/04/2014

Kalfadhiga 4aad
Kulankiisa 15aad
saacadda la furay: 10:50 pm
saacadda la xiray: 1:35 pm
Guntinka: 148

Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Gunaanadka doodii Amniga**
4. **Ka doodidda warbixintii Guddiga Maaliyadda ee Miisaaniyadda Sanadka 2014**

Shir-Guddoonka: Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad JFS Mudane Jeylaani nuur IIkar

Waxaa shirka furey guddoomiye ku-geenka 1aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar waxaana lagu furay Aayadha Qur'aanka Kariinka uuna akhriyay Xildhibaan Sheekh Shaacir. Kadib,Guddoomiyaha wuxuu sheegay in dooda Amniga loo saaray Guddi khaasa ah (ad hoc committee) oo kala ah Guddi Baarlamaanka oo shan xubnood ah iyo Guddiga amniga, wuxuu sheegay in dooda ay bilaabatay.

Xildibaan Cabdi Xaashi wuxuu sheegay in 1991 waarso iyo naato ee sameyey UN dadka aaminsan in ay ciidamo shisheeye wax ka qabankaraan Soomaaiya waa ku hungoobayaan.Golaha shacabka ma aha Gole beeleed .wuxuuna soo jeediyey in dadka la badbaadiyo lana fuliyo go'aanada lagaaro. Taana lagu gaarikaro sinaan,cadaalad, Midnimo iyo horumar.
Ciidamadaan dalalka shisheeye ee tiradooda lagu sheegay 24,000, wuxuu sheegay xildhibaanku in aysan u keeni Karin Soomaaliya degenaan buuxda,welina aysan ka warheynin cidda ay ka

amar qaataan. waxa ay ku shaqeynayaan ma garanayaan haddii ciidan soomaaliyeed la dhiso lana siiyo $400 Mushahaar ah iyo raashiin inuu dalka uu gaarayo xornimo.

Xildhibaan Cusmaan Aadan Dhuubow wuxuu sheegay in wax kasta ay gaabis-kooda ay dhacayn, maantana waxay mareysaa Xildhibaanada in amnigooda la garanwaayo cid u xilsaaran. mas'uuliyaddaas wuxuu sheegay in uu iska leeyahay Madaxweynaha JFS. Isagaana haboon in wax laga weydiiyo. Arintaan waxay timid markii uu yimid dhaq dhaqaaqa Xildhibaanada, arinkaan hadduu sii socdo maandheedka Amisom Gaab ayaa ku imaandoono.

Xildhibaan Cusmaan Cilmi boqore wuxuu sheegay in arinta ay ku soo ururtey Sidee amniga loo sugaa? Sidee ummaadda loo badbaadiyaa ? Wuxuu sheegay hadda ka hor in la siiyo labo askari hubka uu siiyeyna way qaateyn weyna dhaqaaqeyn, ciidanka Xildhibaanka uu doorbidaayo ayaa haboon in lasiiyo waa tan ugu haboon.

Xildhibaan Isaaq Maxamed Maxamud wuxuu sheegey in muddo seddex maalmood howlihii la qabanlahaa loo baajiyey arintaan amniga .Amnigana waxaa u xilsaaran dad haddey ka soo bixiwaayaan wuxuu soo jeediyey in Xildhibaanada ay go'aan ka gaaraan, lana casilo ciddii shaqadeeda ka soo bixiweysa . Guddiga Amnigana waa in ay keentaa warbixin toos ah.

Xildhibaan Qoryeeley wuxuu sheegay in ay waajibtahay in loo ilaaliyo Golaha Baarlamanka sida loo ilaaliyo Madaxweynaha iyo Airporka iyagana loo ilaa liyo shacabkana loo ilaaliyo. waxaa kaloo jira dadka kunool Qoryooleey waxay sugayaan Amni. Qoryooleey waxay ku jirtaa go'doon baabuurta raashiinka wado ma tagaan Hey'adihii arinkaan quseeyay In loo yeero si wax looga weydiiyo.

Xildhibaan Cusmaan Xaaj Ali dadka Amniga qaabilsan dhaqaale iyo qarashaad ma heystaan ayaa xiriir la leh Amniga? Ummaada Soomaaliyeed waxay qabaan dhibaato amnidaro. waxa xamar ka dhaca ma aha shabaa. wuxuu soo jeediyay madaxdii la doortay haddii ay qabsan waayaan in wadada lagu soo daro. Laxisaabtankana waa in laga bilaabaa baarlamaanka, kadibna Hey'adii aan u xilsaaranay Amniga.

Xildhibaan Xuseen Carab ciise wuxuu sheegay in aan la soo marin qaabkii howsha u bilaaban lahayd. Marka hore hey'adda Amniga la dhageysto, nimanka amniga haayana la weydiiyo, maandeedka Amsomna waa in la ogaadaa waxa ay tahay. Guddiga Amniga ee Baarlamaanka qaabka loo howlgalaayo waa qaab cilmiyeysan oo farsameysan in looga hadlo laguna shaqeeyo.

Xildhibaan Cabdilaahi Jaamac waxa laga hadlaayo waa security nabad galyada guud ee Dalka waxay qabtaan Soomaaliya haddey lugaheeda ku istaagto maxaa hortaagan Dowladdii keeni lahayd waa tee?

Xildhibaan ubax tahliil waxay sheegtay in shacabka laga rabo in ay la shaqeeyaan xukuumadda. Waxay soo jeedisey in xildhibaanada loo sameeyo deegaan u gaar ah laguna sugo amnigooda.

Xildhibaan Shuuriye Muumin Afrax wuxuu sheegay Golaha Shacabka in uu lumiyey awoodiisa dastuuriga aheyd .Baarlamaanka wuxuu ku milmay wasiirada.Waxuuna soo jeediyey in la iska daayo taagerida wasiiridda lagana shaqeeyo nabadgalyada shacabka in gudiyada baarlamanka ay shaqadood qabsadaan.Wuxuu weydiiye gudia amniga sababta loo qaban waaye dadka dadka dilaaya cadeestena in ay dadka dilaan iskana baxsadaan? Gudoomiyha baarlamanka mudane jawaari wuxuu sheegay inay is qoreen dhoor iyo sodon xildhiban kana hadlen sida loo sugi lahaa amniga golaha iyo xildhibaanada si istiraajiyad lehna loogu holgalo. Gudiga difaaca iyo gudia fulinta ee iska kaashadan arintaas amniga wuxuu kalo sheegay inuu shir layeeshe sake gudiga amnia iyo gudiga difaaca,wuxuuna soo jeediyay in la siiyo mudo seddex malmooda in ay ku keenaan warbixin sida loogu howlgalayo amniga, wasiirka amnigana uu hor imaanayo golaha maalinta axada ah.

Qeebta 2aad gudoomiyuhu wuxuu u sheegay gudiga maaliyada in oraahda laga soo jeediyo baarlamanka ay u ruuriyaan, mudo seddex maalmod ahna ay ku soo dhameyaan iyaga iyo wasaaarada maaliyada waxyaabaha ka dhiman misaaniyada.

Guddoonka wuxuu kalo sheegay in ay ansixiyeen misaaniyadn seddex bilodla ah ee 2014. Waxaa kalo la siiyay warqad awoodeed oo ay ku bixinkaraan mushaharka shaqaalaha . wuxuuna faray in gudiga maaliyada si dag-dag ah ay ku soo ogadaan sababta loo bixin waayey mushaharka shaqaalaha.

Xildhibaan cabdi xaashi cabdullaahi wuxuu sheegay in gudiga warbixintooda aysan ku soo qorin meesha ugu muhimsan ee daqliga faraha badan ka soo gali karo dowlada, oo ah shirkadaha isgaarsinta. Wuxuu intaa ku daray in 2011 kii warbixinta isgaarsinta ay soo saartay waxaa lagu sheegay daqiiqadaha soomaliya ay kula hadshay mareekanka ay gaareyse 37,009,000 oo daqiiqo mareekankana ku soo hadashay 245,000 oo daqiiqo. Lacagtaas isgaarsinta soomaliya soo gashay waxaa lagu qiyaasay $13,500,000 oo lacagta dolarka ah.

Lacagtaas faraha badan ee so gashay soomaaliya kuma cada miisaaniyada oo ay heleen shirikadaha isgarsiinta waxayna isticmalaan god-ka soomaaliya 252. Wuxuuna soo jeediyay misaaniyada loo qoondeeye xildhibaanada Wasiirada ah ay yartahay, loona baahan yahay in la kordhiyo.Wasirada xildhibaanada ah Waxay qabanayaan howlaha xukuumada iyo mida baarlamanka, meesha ay wasiirada kale at qabanayaan hal shaqo.

Xildhibaan Caasha-koos waxy u mahadcelisey Guddiga Maaliyadda ,waxay sheegtay in aan lagu soo darin warbixinta guddiga dakhliga shirkadaha isgaarsiinta ,waxayna soo jeedisey in dakhliga isgaarsiinta laga bixiyo mushahaaraadka Ciidamada xoogga dalka.

Xildhibaan Maxamed Amiin wuxuu sheegay in canshuur laga qaado shirkadaha korontada. dakhli farabadan ayey qabtaan. wuxuna soo jeediyey lacagta laga jarey wasaaradda Garsoorka oo dhameyd $240,000 lagu soo celiyo halkeeda ,lagana dhigo horumarinta Mas aajidada iyo kor u qaadida wacyiga shacabka.

Xildhibaan Isaaq Maxamed Maxamuud wuxuu sheegay lacagta canshuuraha laga qaado guryaha ee $570,000 ay tahay canshuurta laga qaado hal xaafad. Waa dakhli aad u yar. Ciidamada Miisaaniyadooda waa $49,000,000. Haddii si caddaalad loogu qeybiyo maba dhacdeyn in bil kasto ciidamada loo raadiyo $100. Wuxuu intaa ku darey Wasaaaradda caddaaladda iyo Dastuurka lacagta qoondada ah oo dhan $720,000 Wasiirka wuxuu sheegey in loo isticmaalayo Dastuurka . Tankale,wuxuu sheegay in wax kororsiimo ah aan loo sameynin Shaqaalaha Dowladda iyo Xildhibaanadda. wuxuu soo jeediyey in kororsiimo mushahaareed loo sameeyo Wasiiradda .

XildhibaanFaarax Cawad Jaamac wuxuu sheegey in Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda ay soo sameysey aynan ku jirin lacagta ay bixiyaan dowladaha kale.Miisaaniyaduna waa kharash iyo dakhli lacagaha dalka soo gala meesh ay aadaan waa in caddeyn laga bixiyaa. Islamarkaasna ay ku caddahay Miisaaniyadda Dalka.Wuxuu su'aal ka soo jeediyey Mashaariicda dalka Cidda la xisaabtameysa waa kuwee?

Xildhibaan Cabdiladhiif Muuse Nuur (sanyare) wuxuu ku waafaqay waxa uu halkaan ka soo jeediyey Xildhibaan Cabdi Xaashi C/llaahi in canshuuraha beriga Miisaaniyadda lagu daro lana hakiyo hay'adaha aan qaanuuniga ahayn ilaa looga sameynaayo shuruucdooda.

Xildhibaan Cabdirashiid Xiddig wuxuu soo jeedeyey in Miisaaniyadda lagu caddeeyo Goboladda iyo Degmooyinka waxa ay ku leeyihiin Miisaaniyadda Dalka. Ciidamada Xoogga Dalka Miisaaniyadooda sidooda loo dhaafo aan waxba laga gooynin. in Ciidamadda laga keeno Dhammaan Goboladda dalka ayna ku jiraan Saraakiishooda . Tiradda ciidamadana horey ayaa loo sheegay in ay yihiin 28,000 oo Askari. waxayn ukala qeybsanyihin sida tan:

Ciidamada Dhulka waa 25,000

Ciidamada Cirka waa 1,000

Ciidamada Badda waa 2,000

Wuxuu soo jeediyey in la dhimo kharashaadka safaradda dibadda lagu aado ,lacagaha qalabka iyo lacagaha deymaha . Iyo in loo soo celiyo lacagihii laga jarey Wasaaradda Waxbarashada , Wasaaradda Hidaha iyo Tacliinta Sare,Wasaaradda CaafImaadka, Wasaaradda Caddaaladda iyo Wasaaradda Arimaha Bulshadda.

Xildhibaan Fadhayo wuxuu sheegay in lifaaqa tala bixinta ay soo jeediyeen Gudiga Maaliyadda oo ka koobnaa 15qodob ee lagu ansaxiyey kalfadhigii 2aad kulankiisii 26aad ee 2013ka ayna

ansixiyeen 146 Xildhibaan aan waxba laga qaban. wareegtadii uu soo saarey Ra'iisul waraare Mudane Faarax shirdoon Saacid 09/12/2012 in la keeno tiradda Ciidamada xoogga Dalka ay soo gudbiyeen Miisaaniyaddda gaareysa $29,010,000.

Askariga Dabla ha ah ilaa Generaal ay soo qoreen sida Mushaaraadkooda uu noqonaayo waa sida hoos ku qoran:

D/lle	**$200**	**S/t.hale**	**$300**	**X/lle**	**$500**	**G/dhe**	**$800 .**
A/lle	**$220**	**S/t.L/lle**	**$350**	**L/x.le**	**$500**	**G/sare**	**$850**
L/lle	**$230**	**S/t.S/lle**	**$400**	**S/X,le**	**$500**		
S/lle	**$250**	**S/t.A/lle**	**$450**	**G/lle**	**$500**		

Talo soo jeedintaasi ay soo gudbiyeen Ciidamadda Xooga Guddiga Maaliyadda kuma aysan soo darin warbixintooda Ciidamada in ay soo gudbiyaan tiradooda ,wuxuu soo Jeediyey taa inay ku soo daraan Tirakoobka Ciidamadda in la helo . in lagu daro dakhliga Degmooyinka iyo Goboladda lana cadeeyo 18ka Gobol iyo 93 Degmo waxa ka soo galey.Tiradda Shaqaalaha Darajooyinkooda iyo Mushahaaraadkooda .wixii deyn Xuk-uumadda lagu leeyahay waa in la dhameeyaa sannadkaan.

Kadib Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad, Mudane Mahad Cabdalla Cawad, ayaa wuxuu ka Hadley arinta Baasaboorka iyo ID in Guddoomiyaha uu u xilsaaro Wasaaradda Arimaha Gudaha.Guddoonka Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari wuxuu sheegay in uu dabagal ku haayo howlaha loo xilsaarey .Guddiga arimaha Gudahana in arintaasi dabagal ku sameeyaan.Wuxuu kaloo sheegay in berito la buuxiyo Qourumka.

Guddoomiyaha golaha shacabka, Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, oo shir-guddoominaayey kalfadhigii 4aad Kulankiisa 15aad uu sheegay in uu xiranyahay saacadda markey ahayd 1:35 pm.